*Insticksblad till SABOs broschyr **Skydda dig mot brand***
*Språk: Somaliska*

*Sidan 1/Bogga 1*

# SIDAN AYAAD ISKAGA BADBAADINAYSAA DABKA

*Macluumaad iyo talooyin ku socda qofka degan guri kiro ah*

*Sidan 2/Bogga 2*

**Badbaadin**
Ka bedbaadi adigu naftaada iyo dadka kale ee khatarta ku jira.

**U dig**
U dig dhamaan cid kasta oo ku dhow oo uu khatar ku yahay dabku.

**Alaarm**
Wac 112. U sheeg meesha gubaneysa iyo meesha aan gubaneyn, haddii ay jiraan dad ku xidhmey iyo qofka aad tahay. La kulan debdamiska marka ay yimaadaan

**Dami**
Demi dabka haddii aad u maleynayso inaad awoodi karto.

*Sidan 3/Bogga 3*

## Haddii uu dab bilowdo

Haddii uu dab bilowdo ayaad haysataa dhowr daqiiqo intaan guriga uu qiiq wada qarin. Markaas ayay haboon tahay inaad waxa saxa dhakhso u sameyso.

- Haddii uu dabku ka kaco guriga aad ku jirto, xidh dabka si aanuu fidin oo dibada ugu bixin. Wac 112.
- Haddii uu dabka ka kaco jaarka ama haddii uu qiiq ka baxaayo jaranjarta waa inaad guriga ku jirtaa. Ha u bixin jaranjar qiiq ka buuxo! Wac 112. Istaag daaqad ama balakoonka si laguu arko.

**Si sugan uga bax.**
Qiiqa ayaa ah khatarta ugu weyn marka uu dab dhaco. Dadka ku dhinta dabka badidooda waxa dila qiiqa u gala sanbabka. Qiiqa dabka ayaa ku suuxinaaya oo naqaska kugu dhajinaaya isagoo kugu adkeynaaya inaad ogato meesha aad joogto haddii aad isku deydo inaad dibada u baxdo. Marksta kor ayuu u kacaa. Dhulka hoose ama qiiqa hoostiisa ayaa si ka fiican wax looga arkaa markaa foorarso ama siq haddii aad u baahato.

**Dabka ku xidh**
Haddi uu dab dhaco guriga dhexdiisa oo aanad damin karin, meel ku xidh dabka. Ka caawi dadak kale inay ka baxaan, oo xidh albaabka kadib marka aad dhamaan ka soo wada baxdaan. Iska ilaali haddii ay suurtogal tahay qol qiiq ka buuxo, oo waligaana ha raacin wiishka haddii uu gurigu gubanaayo.

**Waligaa ha u bixin jaranjar qiiq ka buuxo!**
Haddii guriga jaarku uu gubanaayo oo uu qiiq ka buuxo jaranjarta - gurigaaga joog oo sug caawimo.

Caadi ahaan ayaa gurigu xamili karaa dabka ilaa saacadiyadoo uu albaabku iska xejiso dabka ilaa saacad badhkeed.

**Sidan ayaad u dalabanaysaa**
Dabka yar ee guriga ayaa la bakhtiin karaa iyadoo aan la isticmaalin qalab gaar ah oo lagu damiyo. Hadii uu dabku bilowdo mar aad cunto shoolada ku karineysay ayaad dadka ku bakhtiin kartaa fur, bustaha dabka. Dabka ka bilowda duxda, gaasta ama dareeraha kale ee dabka u nugul ayaa kaliya lagu bakhtiin karaa cabudhin. Haddii aad biyo ku shubto dux ama saliid gubaneysa ayay qarxi kartaa oo uu dabka ku sii fidi kraa oo uu keeni karaa dhaawac weyn oo dabka. Dabka ka kaca looxaanta, waraaqaha iyo marooyinka ayaad ku bakhtiin kartaa aigoo dabka ku cabudhinaaya buste, qadiifad ama wax la mid ah.

**Dab damiye**
Waxa wanaagsan in la haysto dabdamiye si aad dhakhso ugu damin karto dabka yar. Aaladaha dabdamiska ee guriga u wanaagsan waa 6-kiiloo budoda wax lagu damiyo iyo bustaha. Budoda wax lagu damiyo ayaad ku damin kartaa noocyad badan ee dabka yar

*Sidan 4/Bogga 4*

## Sidan ayaad iskaga badbaadinaysaa dabka
Waxa jira waxyaalo adigu aad sameyn karto si aad uga roonaato.

- Hubi inaad gurigaaga ku haysato alaarmka dabka, dab damiye iyo bustaha dabka.
- Si jogto ah u tijaabi alaarmkaaga dabka.
- Waxna haku keydsan jaranjarta iyo meelaha la maro ee khanka hoose.
- Madbakha haka bixin marka aad cunto sameynayso.

**Alaarmka dabka**
Haddii uu dab bilowdo marka aad hurudo ayaa dab damiyuhu ku gubi karaa.  Waxa ay ka fal celisaa qiiqa khatarta ah iyadoo kuu digta. Alaarma dabka waa in la dhgo meel aad ka maqli karto marka aad hurudo. Guriga weyn ayaa loo baahan yahay dhowr xabbo, tusaale ahaan qol kasta hal xabo. Waa inuu ku xidhnaado 50 centimeter meel u jirta gidaarka.

Kantarool in alaarmka uu shaqeynaayo, ugu yaraan hal mar bishii ama markaad muddo dheer ka maqnaato. Waxaad tijaabineysaa adigoo isticmaalaaya badhanka tijaabada. Baytariga ka bedel marka uu alaarmka dabku kuu digo ama marka aanu shageyneyn.

Nadiifi alarmka dabka hal mar sanadkii. Huufaree oo ka qalaji hoosta.

**Wax badan ha isku xidhin**
Dabcan waa in guriga la soo xidhaa. Laakiin hadii aad guriga fure ku qufusho oo aanad bahadha la wareejiyo isticmaalin ayay aad kuugu adkaan kartaa inaad ka baxdo marka uu dabku dhaco. Waxay sidoo kale adkeynaysaa in dabdamisku soo galaan xaaladaha degdega.

**Gaadhka shoolada**
Gaadhka shoolada waa ilaalo toos ah oo shoolada taas oo caawimo fiican noqon karta. Waxa ay leedahay timer is bakhtiinaaya haddii shoolada wax badan laga tago ama haddii ay bilaabanto inay gubato.

**Caymiska**
Caymiska guriga ayaan kaa ilaalin karin dabka, laakiin haddii uu shil kugu dhaco ayay wanaagsan tahay in la haysto camiska kaa kafeeya waxa kaa khasaari kara. Fadlan ku keydso sawirada iyo liistada alaabta meel sugan oo gurigaaga ah.

**Goobaha la wadaago**
Jaranjartu waa dariiq laga baxo iyadoo la baneynaayo si gargaarka degdega ay u soo gali karaan haddii loo baahdo. Gaadhiga carruurta, kabaha iyo baaskiilka ayaanay aheyn inaad marna lagaga tago jaranjarta ama ilinka. Ha dhigin sidoo kale qashinka, alaabta guryaha ama waxyaalaha kale. Taasi waxa ay khuseysaa xataa irida khanka guriga hoostiisa iyo khanka banaankiisa. Marka laga reebo inay qashin ku reebto ayay adkeynaysaa in la soo galo iyo khatarta in uu dab ka bilowdo ugu yaraan afartoo dabba mid ayaa kas loo bilaabey.

*Qalabka jaranjarooyinka iyo goobaha kale ee la wadaago waa khatar dabka ah.*

**Katarta madbakha**
Subaga iyo saliida ayaa guban kara haddii heerkulku uu kor u sareeyo. Marka aad wax dubeyso ama shiileyso waa inaad mar kasta aad dabool haysato. Dab ka bilowda shoolada waa in la cabudhiyo iyadoo aad taas si dhibyar ugu sameynayso furka daawaha ama distida. Madbakha haka bixin marka aad cunto sameynayso.

Filterka meelaha hawadu ka baxdo madbakha si joogto ah u nadiifi. Waxa ku dhagaaya duxda, iyadoo uu si dhib yar dab ka bilaabmi karro madbakha iyo godadka hawada ilaa qeynbaha kale ee guriga.

*Sidan 5/Bogga 5*

Madbakha haka bixin marka aad cunto sameynayso!

*Sidan 6/Bogga 6*

*Jaranjarta ayaa ay dariiqaada aad ka baxsaneyso. Ka banee waxyaalaha yaala!*

*Sidan 7/Bogga 7*

## Waxyaalaha dheeraadka ah ee u baahan in laga fikiro

- Mashiinada guriga, aaladaha guriga iyo jaarjarada korontada ayaa bilaabi kara inay gubtaan. Waxaad adigu dhimi kartaa khatarta dabka noocan oo kale ah adigoo daryeelaaha aaladaha oo u isticmaalaaya si sax ah.
- Marna shamaca shidan haka tagin!
- Ka digtoonow sigaarka, rashka iyo dareeraha dabka u nugul.

**Aaladaha korontada**
Jaarjarka, ciyaarah TV-ga, laanbadaha iyo kombiyuuterada – waxaynu guriga ku haysanaa aalado badan oo korontada kuwaas oo kululaan kara. Taasi waa sababaha ugu badan ee dabka, sidaas darteed ka digtoonow inaanad wax dul saarin. Aaladuhu waxay u baahan yihiin dayactir. Hubi in xadhkaha iyo fiishaduhu aanay go'neyn. Ha isticmaalin laanbada ka dab weyn waxa uu qalabka ku rakiban karro.

*Insticksblad till SABOs broschyr* ***Skydda dig mot brand***
*Språk: Somaliska*

Mashiinada guriga
Markasta ka soo saar fiishada marka aad isticmaashay mishiinka qaxwaha, kaawiyada ama makiinada roodhida lugu kuluuleeyo.

*Tv, kombiyuuterka, rikoodhka iyo telefoonka gacanta*
Hab wanaagsan oo laga hor taggo dabka ka bilowda Tv-gu waa in markasta laga bakhtiiyo fiishta, ee aan kaliya lagu damin kantaroolka fog. Waxa sidoo kale muhiim ah in Tv-ga, fiidyowga, kmbiyuuterka iyo rikoodhka ay yaalan meel banaan oo aan wareega hawada la hor istaagin.
Jaarjar garee telfoonkaaga gacanta ama tabledka marka aad guriga joogto ee aad soo jeedo. Meel adag saar waxa aad jaarjar gareynayso kana qaad waxyaalaha dabka ka bilaabmi karro.

*Dhaqida dharka iyo weelka*
Waa caadi ahaan dahcda in uu dabku ka bilwodo mashiinka dharka lagu dhaqo, qalajisahda ama mashiinka weelka dhaqa. Sidaa darteed, hana u oggolaan in mashiinada kuwaas inay ka mid noqdaan marka aad sariirta aado ama guriga ka tago.

**Dareeraha ololi kara**
Dareeraha ololi kara sida shidaalka, isbiirtada iyo gaasta waa in lagu kaydiyo weelka ay asalahaan ku jiraan, iyadoo la dhigaayo meelaha caruurta aanay marna gaadhi karin. Maadaama oo uu dareerahu sii daayo qaax qarxi kara ayay khatar tahay in la shido girgiraha wax lagu dubto ama wax la ololiyo.

Ku keydso gurigaaga qarka dareeraha dabka u nugul ee ugu yar, ugu badnaan 10 litir, oo waligaa ah dhigin khanka guriga hoostiisa - ama khanka guriga dushiisa. Harqadaha loo isticmaalo tusaale ahaan in alaabata guriga lagu baalasheeyo, terbantiinka ama saliid teak ayaa guban kara kaligood. Ku dhaqdhaq biyo diiran oo ku wadh meel hawo leh.

**Khatarka sigaarka**
Sababata ugu badan ee dadku naftooda ugu waayaan gubashada guriga waa dhinbiisha sigaarka. Uma baahna wax dab ah in qofka hurdada ku dhinto. Waxa ku filan kolmonogsadhka ka soo baxda marka ay alaabta gurigu iyo dharku gubtaan. In sigaar lagu cabo sariirta, kursiga fadhiga ayaa sidaas darted noqon karta waxa khatar badan leh.
Hubi markasta in haashka saani loo bakhtiiyey marka aad faaruqineyso hashtariga. Hab sugan waa in biyo la raaciyo ka hor inta aanad ku tuurin qashinka.

**Dabka furan iyo rashka**
Haddii aad shido shamac, dooro aaladaha shamaca ee xasiloon ee ka sameysan waxyaalaha aan guban karin. Shamaca biraha yaryar la dhigo iyo maryahu waxay isku yihiin khatar. Dhig shamca meel sugan oo masaafad u jirta dharka dabku uu qabsan karro, hana u ogolaan inay gubtaan. Shamaca shidan toos ha u dul saarin miis ama kursi, hana isku dhaweyn iyaga. Marna carruurta ha kaga tagin kaligood meel uu shamaca shidan ama dab furan yaalo. Sharci wanaagsan waa in qofka shidey dabku uu isagu bakhtiiyo, ama in qofka ugu danbeeya ee qolka ka baxa uu dabka bakhtiiyo.

Rashku waxa uu keenaa dab badan inuu dhaco. Raac tilmaamaha oo raakeedka ha u ridin si uu qof kale balakoonkiisa daaqadiis ama meel kale ugu dhaco halkaas oo uu keeni karro dab inuu ka bilaabmo.

*Insticksblad till SABOs broschyr **Skydda dig mot brand***
*Språk: Somaliska*

*Sidan 8/Bogga 8*

## Xogta ku sabsan dabka

### Sidan ayaad u damineysaa haddii ay gubtaan:

DHARKU
Haddii uu qof dharkiisu gubanayaan ayaa loo baaha nyahay in la dhakhsado: Qofka jiifi dhulka. Dabka ku dami bustaha dabka ama waxa aad heli karto. Dul saar bustaha dabka laga soo bilaabo madaxa ilaa mijaha si uu olalku u qabsan qofka wajigiisa.

LOOXA, MAROOYINKA, WARAAQAHA AMA ALAABTA GURIGA
Ku dami bustaha dabka, biyo ama dabdamiyaha.

SALIIDA AMA SUBAGA
Haddii uu dab ka bilowdo shoolada cabudhi dabka adigoo dul saaraaya fur. Waxaad sidoo kale isticmaali kartaa bustaha dabka. Bakhtii marxawada. Waligaa ha isku deyin inaad dabka ka kaca distida ama daawaha ku bashtiiso biyo!

XAYDHA SHAMACA
Dabka ku cabudhi filterka dabka ama wax la mid ah, ama isticmaal dabdamiyaha gacanta.

AALADAHA KORONTADA
Marka hore ka saar fiishada. Kadibna ku bakhtii biyo ama dabdamiyaha. Haddii ay suurtogal tahay isku dey inaad aalad geyso meel banaan sida balakoonka.

DAREERAHA DABKA U NUGUL
Dabka ku dami dabdamiyahaaga ama ku cabudhi bustaha dabka ama wax la mid ah.

**Miyaad ogsoontey in...**

- Wax ka badan boqol qof ay sanad walba ku dhintaan dabka oo 9 kiiba 10 dabka lagu dhinto uu ka dahco guryaha dabaqa.
- Dadka ku dhinta dabka badidooda waxa dila qiiqa u gala sanbabka.

**Talooyinka yaryar oo baajin kara dabka**

- Marna sigaar haku cabin sariirta.
- Guriga joog marka qasaalada, mashiinka weelka ama qalasidau ay shaqeynayso.
- Waxba haku daboolin hiiterka korontada ama aaladaha kale ee korontada.
- Hubi in laanbadaha iyo falaashyadu aanay u dhaweyn wax guban kara ama dhici kara.
- Bedel laanbada bidh-bidh leh. Waa ay kululaan karaan. Hal mar wada bedel switjka.
- Fiishada ka saar marka  timo qalajiyaha, jaarjarka telefoonka gacanta iyo kambiyuuterka aan la isticmaaleyn.
- U tudh xadhiga. Xadhiga go'an ayaa sababi kara shoog iyo dab inuu ka bilowdo.
- Shamaca midba meel dhig. Haddii ay isku dhowdhow yihiin ayaa kulku badan karaa iyadoo uu shamacu guban karo o uu abuuri karro olol weyn.
- Hubi inaaan wax halka kore ka saarneyn nalka shidan iyo inay toos u taagan yihiin.

*Insticksblad till SABOs broschyr* ***Skydda dig mot brand***
*Språk: Somaliska*

- Afuuf ololka marka aad qolka ka baxdo!

**Sababaha badanaa keena dabku waa:**

- Cunto lagu iloobey shoolada
- *Dabka kas la qabadsiiyay*
- Sigaarka
- Shamaca shidan